

Ku socota waalidiinta iyo dadka ardayda masuulka ka ah ee xanaanada caruurta Ilabekken, xanaanada caruurta ee Sverresborg, xanaanada caruurta ee Vårres, iskuulka Åsveien iyo xarunta kheyraadka iyo dugsiga dhaxe ee Uglå.

Warbixin loogu talo galay waalidiinta oo ku ku saabsan mashruuc dhaw oo tijaabo ah.

Caruurta waxa ay heli doonaan nidaam u samayn fiican oo ah xanaanada caruurta dugsiga iyo SFO ooga

Xanaanooyinka caruurta ee Ilabekken, xanaanada caruurta ee Sverresborg, xanaanada caruurta ee Vårres, dugsiga hoose dhexe ee Åsveien iyo xarunta kheyraadka iyo dugsiga dhexe ee Uglå ayaa ka qeyb qaadan doona tijaabada dhaw ee mashruucaan.

Hadafka guud ee mashruuca dhow waa in la hagaajiyo nidaamka hadda jira iyadoo la sameynayo iskaashi hore iyo mid dhow oo u dhexeeya xirfadleyda/aqoon yahanada, carruurta iyo waalidiinta.

Mashruucaan dhowi wuxuu tijaabin doona nidaam taageero oo dhameystiran oo loogu talagalay carruurta, ardayda, xanaanada, dugsiga iyo waalidiinta / dadka ardayda masuulka ka ah. Ficil ahaan, mashruuca waxa uu macnaheesu yahay si guud in loo helo in la-taliyayaasha Adeegga Cilmi-nafsiga ee Barbaarinta (PPT), Kooxda Dugsiga iyo Maalin Dugsiyeedka ay kulan joogto ah ku yeelan doonaan xanaanooyinka iyo dugsiyada si loo daboolo mashruuca. PPT waxay ku yeelan doontaa kaalin iskuxirid ah adeegyada kale ee taageerada ee degmada si loo hubiyo qaab dhameystiran.

Iyadoo la adeegsanayo mashruucaan, si carruurta iyo dhalinyarada u helaan dalab waxbarasho iyo mid gaar ah oo si fiican loo habeeyay iyo kordhinta ka mid noqoshada xanaanada, iskuulka iyo daryeelka iskuulka kadib. Tijaabadu waxay ilaalinaysaa xuquuqda sharciga ah ee helitaanka kaalmada waxbarashada gaarka ah iyo waxbarashada gaarka ah meesha ay jirto, ama loo arko, inay u baahan tahay.

PPT waxay kaqaybqaadan doontaa shirarka waalidka si loogu wargaliyo mashruucaan.

Kaqaybgalka waalidiintu waa qayb muhiim u ah mashruuca waxaana daryeelaya guddiga / maamulaha qaybta shaqsiyeed. Adiga waalid ahaan / masuul ahaan, waxaad wali laxiriirtaa shaqaalaha ama guddiga / maamulaha xanaanadaada caruurta ama iskuulkaaga.

Mashruuca dhawi waa mashruuc qaran oo la socon doona cilmi baarista bulshada ee NTNU iyo machadka daraasaadka hal abuurnimada, cilmi baarista iyo waxbarashada ee Nordic (NIFU), ayagoo taageero ka helaya agaasinka waxbarashada Norway, waxay baari doonaan saamaynta duuliyaha.

NTNU Cilmi-baarista Bulshada ayaa bixin doonta macluumaad dheeri ah oo ku saabsan qeybta cilmi baarista ee la xiriirta mashruuca.